

TILMAAMAH LA SIIYO BUKAANKA DAWEYNTA NUKLEARKA KLIINIKADA MANKATO

Sawirka Shaqada Murqaha Wadnaha (Myocardial Perfusion Imaging) ee
Lagu Sameeyo Baarista Shiddada Lexiscan
Baarista Labada Maalin

Myocardial Perfusion Imaging with Lexiscan Stress Test -2 Day Test - Somali

Bukaanka: _____

Maalinta 1aad: Taariikhda Ballanka: _____ **Waqtiga:** _____ am / pm

Maalinta 2aad: Taariikhda Ballanka: _____ **Waqtiga:** _____ am / pm

**Goobta: Nuclear Medicine Department, Mankato Clinic
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001**

Maalinta 1aad: Baarista Ka Hor (U ogolow 1 saac baarista maanta):

- Waxaad keentaa liis qoran oo ku saabsan dhamaan dawooyinka aad qaadatid. Hubso in aad ku dartid dawooyinka la qoro, dawooyinka laga iibsado miiska, maadooyinka dabiiciga iyo cagaarka.
- Ha soo qaadanin shay laga helo macdanta birta inta ka koreyso dhexda.
- Haddii aad la kulantid qufac waqtiga baarista, fadlan soo qaado dawooyinka joojiya qufaca/shorobada.
- U sheeg bixiyehaada haddii aad naas nuujisid, haddii aad uur leedahay ama haddii aad u maleysid in aad uur leedahay.

Maalinta 1aad: Inta ay Socoto Baarista:

- Farsame yaqaanka wuxuu bilaabi doonaa in uu cirbad ku muddo garabkaada ama gacantaada, xididka dhiigga ku celiya wadnaha (intravenous) (IV)
 - Waxaa laguugu durri doonaa maadada shucaaca aad ka qaadatid cirbidda IV.
 - Waxaad ku seexan doontaa dusha adiga oo seexda miiska sawirka.
 - Sawiro ayaa laga qaadi doonaa wadnahaada, waxaana lagu qaadi doonaa kaamera khaas ah.
- Qiyaas ahaan, waxay qaadan doontaa 25 daqiqo. **WAA** in aad seexatid aadna dhaqaqain inta sawirada la qaadaayo.

Maalinta 1aad: Baarista Kaddib:

- Waxaa lagaa saari doonaa IV.
- Waxaad ku noqon kartaa hawlahaada caadiga.

**Haddii aad u baahan tahay in aad dib u dhigatid ama in aad joojisid ballankaada,
ama aad qabtid su'aalo ku saabsan baarista, wac 507-385-3955.**

**Nuclear Medicine waxay ku taal Main Street, dabaqa kowaad. Fadlan
iska xaadiri waaxda Wadnaha (Cardiology).**

TILMAAMAH LA SIIYO BUKAANKA DAWEYNTA NUKLEAR KA KLIINIKADA MANKATO

Sawirka Shaqada Murqaha Wadnaha (Myocardial Perfusion Imaging) ee Lagu Sameeyo Baarista Shiddada Lexiscan - Baarista Labada Maalin

Myocardial Perfusion Imaging with Lexiscan Stress Test -2 Day Test - Somali

Maalinta 2aad: Baarista Ka Hor (U ogolow 3 saac baarista maanta):

- Ha cabbin sigaar muddo 24 saac ka hor inta aadan gelin baarista. Waxaa ka mid ah sharootada nikotiinka.
- **Ha cunin ama ha cabbin waxyaabaha laga helo kaffeine 12 saac ka hor inta aadan gelin baarista. Waxaa ka mid ah qaxwada laga saaray kaffeinka iyo dhamaan noocyada shaaha, cabbitaanka, waxyaabaha ka samaysan shukulaatada, Anacin® and Excedrin®.**
- **Ha cunin ama ha cabbin waxba muddo 6 saac ka hor inta aadan qelin imtixaanka.**
- **Ha marsan saliid korka** (maxaa yeelay sharootada ECG si wanaagsan uguma dhagi doonto).
- Raac tilmaamaha ku saabsan isticmaalka daawada aad ka soo qaadatid bixiyehaada.
- Waxaad keentaa liis qoran oo ku saabsan dhamaan dawooyinka aad qaadatid. Hubso in aad ku dartid dawooyinka la qoro, dawooyinka laga iibsado miiska, maadooyinka dabiiciga iyo cagaarka.
- Waxaad keentaa qalabka lagu neefsado ee aad sida joogtada ah u adeegsatid.
- Ha soo qaadanin shay laga helo macdanta birta inta ka koreyso dhexda.
- Waxaad qaadataa labis holof ah, u roon korka, iyo kabaha socodka.
- Waxaa lagu weydiin doonaa in aad iska dhigtid dharka laga bilaabo dhexdaa ilaa inta ka koreysa. Dumarka waxaa la weydiin doonaa in ay labistaan naas celinta, waxaana la siin doonaa gorgoro ay qaataan inta ay socoto baarista.
- Haddii aad la kulantid qufac waqtiga baarista, fadlan soo qaado dawooyinka joojiya qufaca/shorobada.
- U sheeg bixiyehaada haddii aad naas nuujisid, haddii aad uur leedahay ama haddii aad u maleysid in aad uur leedahay.
- **Xasuusinta la siiyo Bixiyeyaasha:**
 - *Bukaanka isticmaala daawada dipyriramole ama dipyriramole ee laga helo daawada (aggrenox, persantine) waxay u baahan yahiin in ay la tashtaan bixiyehooda. Lاما qaadan karo dawooyinkaan muddo 48 saac gudahooda kaddib marka la galo baarista.*
 - *Bukaanka la siiyay dawooyinka aminophylline muddo 24 saac gudahooda ka hor inta aysan gelin baarista waxay u baahan yahiin in ay dib u ballansadaan baarista shiddada (stress).*
 - *Waxaa dhici karto in Methylxanthines iyo Theophylline soo farageliyaan hawsha Lexiscan.*

Maalinta 2aad: Inta ay Socoto Baarista:

- Farsame yaqaanka wuxuu bilaabi doonaa in uu cirbad ku muddo garabkaada ama gacantaada, xididka dhiigga ku celiya wadnaha (intravenous) (IV)
- Waxaad tagi doontaa shayaarka qeiybta shiddada baarista. Kalkaaliye ama farsame yaqaanka shiddada wuxuu sharootada ECG saari doonaa xabadkaada iyo wuxuu suunka cadaadiska dhiigga ku xeri doonaa gacantaada. Waxaa loo isticmaali doonaa in laguugu kormeero inta baarista socoto.
- Waxaa laguugu duri doonaa cirbadda Lexiscan iyo waxaad maadadaa shucaada ka qaadan doontaa IV.
- Baarista shiddada kaddib, waxaa wadnahaada laga qaadi doono sawiro. Sawiradaan waxay qaadan doonaan 15 ilaa 20 daqiiqo. **WAA** in aad seexatid aadna dhaqaqaqin inta sawirada la qaadaayo.
- Qiyaas ahaan, baarista waxay qaadataa 3 ilaa 4 saac.

Maalinta 2aad: Baarista Kaddib:

- Waa lagaa saari doonaa sharootada IV iyo ECG.
- Heerka dhaqaqa: U dhaqaqa sida uu ku talliyo bixiyehaada ilaa aad ka heshid natijjada. Haddii bixiyehaada uusan ku siinin tilmaamo ku saabsan dhaqaqa, fadlan yaree dhaqaqa ilaa bixiyehaada kaala soo xariiro natijjada baarista.
- Kooxda daryeekla caafimaadka ee fullisa baarista awood uma yeelan doonaan in ay bixiyaan natijjadaha baaritaankaan kaddib marka la dhamaystiro.
- Xafiiska bixiyehaada ayaa kaala soo xariiri doono natijjada baarista.

Haddii aad u baahan tahay in aad dib u dhigtid ama in aad joojisid ballankaada, ama aad qabtid su'aalo ku saabsan baarista, wac 507-385-3955.

Nuclear Medicine waxay ku taal Main Street, dabaqa kowaad. Fadlan iska xaadiri waaxda Wadnaha (Cardiology).

Bogga 2/2

MANKATO CLINIC